



OGOW WAXYAABAHA KUU BANAAN:  
Buug-yare loogu talagalay magangalyo-  
doonka iyo qaxootiga ku sugar Thailand.



# OGOW WAXYAABAHA KUU BANAAN

Buug-yare loogu  
talagalay magangalyo-  
doonka iyo qaxootiga  
ku sugar Thailand.





## Kusaabsan Asylum Access Thailand

Iyadoo la aas-aasay 2007dii, Asylum Access Thailand (AAT) waa urur aan dawli ahayn oo qaybka ah qoyska Asylum Access. waxaan ka shaqaynaa in aan xuquuqda aadamaha mid dhab ah uga dhigno qaxootiga. waxaan aaminsanahay in dhamaan qaxootigu ay uqalmaan fursad cadaalad ah oo ay ku samaystaan nolol cusub.


AAT waxay bixisaa tala-bixin sharchiyeed iyo matalaad ay ku matalaan qaxootiga doonaya magangalyada fal-sharchiyeedka go'aan ka gaadhidda xaalada qaxootinimo ee ay samayso hay'adda qaramada midoobay uqaabilsan qaxootiga (UNHCR) ee Bangkok. macaamiishaanadu waxay kasoo kala jeedaan in ka badan 40 jinsiyadood oo kala dugan. Halka badidood ay kasoo kala jeedaan Pakistan, Vietnam, iyo Cambodia, waxaan sidookale la kulanna macaamii kasoo jeeda Somalia, Sri Lanka, China, Afghanistan, Iraq iyo wadamo kale oo badan. si loo wajaho baahida daran ee loo qabo kaalmo sharchi oo lagu bixiyo daraasiin luuqado ah, waxaanu u taba-barnaa qaxootiga sidii ay unoqon lahaayeen turjubaano sharchiyeed.

AAT sidookale waxay fulisaa hawlaha iskaashiga ee xoojinta sharchiyeed ee bulshada si sare loogu qaado awooda qaxootiga. Hawlaheena waxaa kamida maaraynta kooxaha Democratic Collective Action (Ficilka Loo-dhanyahay ee Dimuqraadiga ah), taageero bulsho oo kusalaysan bulshada, iyo taageerada dadka isku asaagga ah si loo kordhiyo fursadaha nololeed iyo gaarsiinta kulammada tababarka Know Your Options (Ogoow Waxa Kuu banaan).

AAT waxay isbahaysi ahaan kula shaqaysaa ururada kale Thai-ga iyo koonfur-bari aasiya, oo ay kamid yihiin Coalition for the Rights of Refugees and Stateless Persons (Isbahaysiga Xuquuqda Qaxootiga iyo Dadka aan Dawlad lahayn), Bangkok Asylum Seeker and Refugee Assistance Network (Shabakadda Caawinta Qaxootiga iyo Magangalyo-doонка Bangkok), The Core Urban Refugee Network (Shabakadda Xudunta u ah Qaxootiga Magaalada) iyo Asia Pacific Refugee Rights Network (Shabakadda Xuquuqda Qaxootiga ee Aasiya iyo Baasifiga). anagoo isticmaalayna iskaashigan, waxaan si wadajir ah ugu doodnaa isbadal lagu sameeyo sharciga Thialand iyo siyaasadda taasoo abuuri doonta ilaalo xoogan oo ay helaan qaxootiga iyo magangalyo-doонка gobolka oo dhan.

### Nalasoo xiriir

1111/151 Ban Klang MuangLat Phrao Rd, Chan Kasem Chatuchak, Bangkok 10900  
Telefoon: +66 2513 5228  
Email: [thailand@asylumaccess.org](mailto:thailand@asylumaccess.org)



## TUSMADA BUUGA

1. WAXA KA CUSUB XAALADDA QAXOOTIGA THAILAND	1
2. ARIMAHAD SOCDAALKA	3
3. ILAALADA IYO BADQABKA	10
4. QOYSKA IYO HAB-NOLOLEEDKA	14
5. WAXBARASHADA	20
6. WAXA LASAMEEYO IYO WAXAAN LASAMEYN	26

---

### Afeef

Buuggan-yar ee KYO waxaa soo saaray AAT. Waxyabaha ku qoran Buug-yarahaan KYO ma sameynayo talo bixin sharchiyeed mana aha in sidaas oo kale laisugu halleeyo. Waxaa loogu talagalay in hab kooban loogu bixiyo macluumaad guud , haddadan xiliga daabacaadda. Macluumaadka ku jira Buug-yarahaan KYO waa mid hadda ah laga bilaabo [22 Oktoobar 2019]. Macluumaadka si dhakhso ah ayuu isu beddeli karaa.

Fadlan toos uga hubso AAT haddii aad qabto wax su'aalo ah



Waxaa maalgalisay dawladda Maraykanka

1

WAXA KACUSUB XAALADDA QAXOOTIGA

**THAILAND**

## WAXA KACUSUB XAALADDA QAXOOTIGA THAILAND

Thailand waxay hoy u tahay ku dhawaad 4,300 qaxooti ah iyo 850 magangalyo-doon ah kuwaasoo dalalkooda oga soo cararay iskudhacyo hubaysan iyo cadibaad.

Wadamadooda asal ahaaneed waxaa ka mid ah Pakistan, Sri Lanka, Vietnam Cambodia, Somalia, Palestine, Syria iyo China.\*

In kasta oo Thailand aysan ahayn mid saxiixday Heshiiskii Qaxootiga ee 1951, Thailand waxay isku dayday in ay qaaddo tallaabo horumar xagga ilaalinta iyo xalka qaxootiga iyo magangalyo-doonka ah gudaha Thailand. Si kastaba ha noqotee, qawaaniinta iyo siyaasadaha ayaa weli ah kuwo socda sidoo kale Weli ma cada saameyntooda ay ku leedahay qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku sugaran Thailand.

### Dib-u-celin Ikhtiyaari ah

Dib-u-celinta Ikhtiyaariga ah waa howsha dib-ugu-laabashada dalka iyadoo lagu saleynayo ikhtiyaarka shaqsiyadeed iyadoo la kaashanayo UNHCR iyo IOM qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku jira boroseeska.



IOM waxay awooddhaa inay caawiso kiisaska xiran si ay ugu noqdaan wadankoodii iyaqoo u maraya Barnaamijkooda Caawinaada noqoshada ikhtiyaariga iyo dib udhexgalka (BCNID). BCNID waxay qaadan kartaa bilooyin badan. Macluumaad dheeri ah, fadlan kala xiriir IOM adoo raacaya: (Tele: +66) 2-343-9300, emayl: iomthailand@iom.int

Qaxootiga la aqoonsanyahay ama magangalyo-doonayaasha ku jira boroseska RSD-ga, Waa in UNHCR lagala soo xiriiraa arinta la xiriirta noqoshada ikhtiyaariga. UNHCR, oo kaashaneysa barnaamijka IOM BCNID, waxaa dhici karta inay awoodo inay ufududayso shaqsiyadka ay UNHCR danaynayso (qaxooti iyo magangalyo doon labadaba). Haddii aad rajeyneyso inaad laabato ama aad jeelaan laheyd inaad hesho macluumaad dheeri ah, fadlan la xiriir UNHCR si aad usameysatto ballan adigoo raacaya qaabkan: lambarka xafiiska UNHCR: (+66) 2-288-2330 or (+66) 2-288-2529 (Saacada shaqada : 08:00 - 16:30) ama emayl ku soo dir: THABA@unhcr.org

\*Xog laga soo qaatay kulankii BASRAN, ee bisha 9aad 2019ka

2

# ARIMAH SOCDAALKA

# ARIMAHА SOCDAALKA

## A Fiisooyinka iyo Sharciga

### 1. Maxey tahay sababta naloogu xirayo kuxad gudubka sharciyada socdaalka hadii aan nahay magangalyo-doон / qaxooti?



- ▶ Marka loo eego sharciga Thai-ga, haddii aad gasho Thailand adigoon haysan duku-minti sharci ah ama ogolaansho oo aadan ku soo gelin barta baaritaanka socdaalka, waxaa laguu tixgelin doonaa inaad si sharci darro ah ku gashay Thailand.
- ▶ Haddii aad hesho dal-kugal Thailand laakiin aad sii joogto Thailand ka dib markii uu dal-kugalkaagu dhaco, waxaa markaa laguu tixgelinaya inaad tahay qof joogay mudo kabaden intii loo ogolaaday oo sharci-darro ah waxaana suuragal ah in lakulanto xabsi ama masaafuris. Ma jiro sharci ka jira Thailand oo lagu kala saarayo qaxootiga iyo muhaajiriinta kale ee uu kadhaco dal-kugalkooda maxaa yeelay Thailand qayb kama ahan heshiiskii Qaxootiga ee 1951.

### 2. Taxaddarro nooceee ah oo ku saabsan socdaalka ayaan yeelan karaa inta aan halkan Thailand joogo.



- ▶ Marka loo eego sharciga Thai-ga, waxaa lagaaga baahanyahay inaad wadato aqoonsi uu ka muuqdo sawirkaagu markasta oo aadan gurigaaga joogin, oo ay kamid tahay marka aad guri raadsanayso iyo marka aad laxiriirayso qof guri kaa kireeya.
- ▶ Xusuusnow in xukuumadda Thai-ga sida booliska, saraakiisha laanta socdaalka, ama askarta, ay xaq u leeyihii inay ku weydiyyaan aqoonsiga markasta.
- ▶ Koobi ka samee baasaboorkaaga iyo dukumiintiyada muhiimka ah oo ku kaydso meelo kala gadisan adiguna wado.

### 3. Sideen ku cusboonaysiin karaa dal-kugalkeyga si sharci ah?



- ▶ Waxaa lagaa doonayaa inaad ka tagto Thailand si aad u codsato fiiso Dalxiis ama mid Waxbarasho oo cusub.
- ▶ Boroseska sida sharciga dib loogu cusboonaysiinayo dalkugalka waxay kuxirantahay nooca fiisaha aad haysato. Wuxuu macluumaad dheeri ah oo kuqoran Ingiriis ama Thai ka heli kartaa bogga websaytka Wasaaradda Arimaha Dibadda <http://www.mfa.go.th> ama <http://www.thaiimmigration.net/>

### 4. Maxay yihiin khataraha kusaabsan fiisooyinka Thailand

#### Adeegsiga Wakiil.

- ▶ Dadka sheegta inay ku siin karaan dalkugal waxaan ugu yeernaa 'wakiilo.' Kuwan badanaa waa wakaalado safar oo madax banaan ama dadka ka shaqeeyaa fiisooyinka sharci darrada ah. Xusuusnow in:
  - Fiisooyinka uu sameeyo wakiil inta badan waa mid laxaday ama waa been abuur;
  - Wakiilku wuxuu sheegan karaa inaysan ogayn in fisahaasu ahaa mid been abuur ah, isagoo ku dhaxalsiinaya in laguu qabsado dacwado laxiriira khiyaano .

- ▶ Haddii aad hesho oo aad isku daydo inaad isticmaasho fiisooyin been abuur ah ama la xaday, waa fal dambiyeed xambaarsan ilaa 10 sano oo xabsi ah. Wuxaan kaloo halis ugu jiri doontaa masaafuris ama xabsi. Fadlan la soco inaysan UNHCR kaa caawin karin dacwad dambiyeed.
- ▶ Wakiiladu waxay fiisooyinka duldhigaan qiime aad u badan marka loo eego dowladda.

### Inaadan Heysan Dal-kugal/Fiiso

- ▶ Waxaa gudaha Thailand laguu tixgalinaya sharci darro waxaadna halis ugu jirtaa xarig iyo xabis.
- ▶ Si xor ah uma socon kartid fiise la'aan. Helitaankaaga adeegyada aasaasiga ah, sida guriyeynta, waa mid xadidan.

### Haddii lagaa codsado inaad bixiso ganaax maxkamadeed oo aadan awoodi karin wakhtigaas:

- ▶ Gorgortanka tirada lacagta waa caadi laakiin haddii ay umuuqato mid aan gorgortan gali karin, waydii inaad wacan karto saaxiib ama qoys ama AAT si ay kuu caawiyaan.
- ▶ Waxaa lagu gelin karaa xabsi - muddada xabsiga ah ee lagu mutaysan karo bixin la aanta ganaaxa maxkamadeed waa THB 500 maalintii.
- ▶ Marka lagu xabiso kadib, waxaa lagu geyn doonaa xarunta xabsiga ee laanta socdaalka (IDC).

Maxaa dhacaya haddii la i xiro, sideen uga jawaabi karaa oo maxaan filan karaa?

STus kaarkaaga UNHCR oo wac lambarka khadka taleefanka ee UNHCR

- UNHCR waxaa laga yaabaa inay waan-waan kagasho sidii laguu. siidayn lahaa
- Haddii lagu geeyo saldhig boliis, waxaa lagu weydiin doonaa macluumaad asaasi ah oo ku saabsan naftaada waxaana lagugu eedeynayaa inaadan haysan fiiso iyo / ama aadan haysan baasaboor.
- Waxaa lagu galin doonaa liiska madow ee Socdaalka Thai-ga mana laguu ogolaan doono inaad wadanka soo gasho muddo 5 sano ah. Kiiska joogitaanka in kabaden mudada la ogolyahay, waxaa 10 sano lagu galin doonaa liiska madow.
- Kiiskaaga waxaa la keenayaa maxkamada waxaana lagu weydiin doonaa inaad bixiso ganaax maxkamadeed.
- Marka lagusoo qabto, waxaad sidookale mudan kartaa in xabsi ay kugu hayaan laanta socdaalku. Arin kasta oo ey noqoto, fadlan noqo mid lashaqeeyaa oo ixtiraama maamulka (maahan booliska oo keliya, waxay noqon karaan saraakil kasocota wasaaradda arrimaha gudaha, ama ciidanka).

**XIRIS  
IYO  
WEERARKA  
KEDISKA AH**



Maxaa dhacaya haddii uu dabaqeygu ka jiro weerar booliis oo kedis ah?

- Weerarada dabaqa ah badanaa waa heer ballaaran oo dad badan ayaa laga yaabaa in la qabto isla waqtigaas.
- Hal qof waa inuu wacaa khadka taleefanka ee UNHCR oo uu gudbiyaa cinwaanka dhismaha iyo haddii ay suurogal tahay, inta qofood ee ku lug leh iyo haddii ay dhammaantood yihiin qaxooti iyo magangalyo-doон, ama koox isku-dhafan.
- Haddii sargaalka UNHCR aan laheli karin, waxaad sidoo kale wici kartaa ururada u adeega qaxootiga, oo ay kuijirto AAT

- ▶ Haddii ay jirto xaalad deg-deg ah, fadlan laxiriir khadka taleefanka xaaladaha degdegga ah ee UNHCR (+66) 81-899-7617 (laga bilaabo 16:30 illaa 23:00 maalmaha shaqada iyo min 8:30 illaa 23:00 dhammaadka isbuucaa).
- ▶ Haddii aadan heli karin saraakiisha UNHCR, isku day inaad la xiriirto hay'ad kale oo u adeegta qaxootiga sida Asylum Access Thailand (AAT).

## ARIMAHAA LA XIRIIRA XALKAA WAARA EE UNHCR



kiiskeygu wuu xiranyahay waxaan daneynaya inaan ku laabto wadankeyga (Laabasho ikhtiyaari ah)

### yaan la xiriiri karaa?

Waxaad la xiriiri kartaa ururka soo socda si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan laabashada ikhtiyaariga ah:

**Hay'adda Socdaalka ee Caalamiga ah ee IOM \***

Dabaqa 18aad, Dhismaha Rajanakarn, 3 South Sathorn Rd, Bangkok 10210  
Saacadaha Shaqada: Isniinta - Jimcaha 08:00 - 17:00 Lambarka lagala Xiriiro:  
(Telefoon: +66) 2-343-9300  
iimelyl: iomthailand@iom.int

**Haddii aad ku jirto IDC-da - fadlan la xiriir sargaalka UNHCR-ta ee jooga gudaha IDC-da.**



Kiiskeyga RSD-ga ee UNHCR wali waa mid shaqeynaya / furan oo waxaan rabaa inaan ku laabto wadankeyga.

### Yaan la xiriiri karaa?

Fadlan la soco in Dib-u-celinta ikhtiyaariga ah ee loo maro UNHCR loogu talagalay kiisaka shaqeynaya kaliya.

Fadlan kala xiriir UNHCR wixii faahfaahin dheeri ah:

Lambarka Xafiiska UNHCR:  
(+66) 2-288-2230 iyo (+66) 2-288-2529  
(inta lagu guda jiro saacadaha xafiiska).

limayl: THABA@unhcr.org



### Waxaan wali sugayaa dib-udejin.

- Fadlan la soco in aqoonsiga qaxootnimada aysan micnaheedu aheyn in dib-udajin laguu sameyn doono. Fadlan fahan in dib-u-dejintu aysan aheyn xuquuq ama dammaanad dhammaan qaxootiga. Adduunka, in ka yar 1% oo qaxooti ah ayaa dib-udajin loo sameeyaa sanad walba. Fursadaha dib-u-dejinta ee qaxootiga magaalada gudaha Thailand waa mid aad uxadidan. Helitaanka xaaladda qaxootinimo kuuma damaanad qaadeyso dib u dejin ama xitaa tixgalin dib u dejin. In laguu tixgaliyo sida muhiimka ah ma sababto in dibu dajin laguu sameeyo.

UNHCR way kula soo xiriiri doontaa hadii laguu tixgaliyo dib u dajin.

- Haddii kiiskaaga loo gudbiyey dib-u-dejin iyadoo loo marayo UNHCR, go'aanka lagu aqbalayo ama lagu diidayo kiiska waxaa sameeya dalka dib u dejinta ee kiiskaaga loo gudbiyey.



### UNHCR ma fududeysaa resboonsarka gaarka ah?

- UNHCR, BRC, AAT, iyo JRS door toos ah kuma laha resboonsarka gaarka ay bixiyaan dowladaha kaladuwan ee daafaha adduunka. Waxay kuxirantahay sharciga socdaalka ee wadan walba.

- Fadlan dalabkaaga resboonsarka oo uu lasocdo koobiga kaarkaaga UNHCR si toos ah ugu soo gudbi safaarada ama laanta socdaalka ay khusayso, adigoo raacinaya codsi ah in laanta socdaalku ay la xiriirto UNHCR si ay u xaqijiso xaalada qofka qaxootiga ah ee resboonsarka loo xareeyay.



Waxaan diyaarsaday resboonsar gaar ah ama dib u dejin waxaan u baahanahay Kaarka Qaxootiga ee UNHCR ee la aqoonsan yahay - UNHCR ma bixin kartaa mid?

- Waxaad wali u baahan doontaa inaad la xiriirto oo aad marto nidaamka UNHCR ee go'aan kagaarista xaaladda qaxootinimo (RSD).

- Dhammaan shaqsiyaadka ey daneysa UNHCR waxay heli doonaan kaarka marka la diiwaangelinayo iyo inta borosesku socdo. Kaarka lama kordhin doono ama waxaa loo baahan doonaa in lasoo celiyo marka kiiska uusan sii shaqeynayn.

# B Xarunta Haynta Socdaalka (IDC)




## 1. Sidee ayey UNHCR u socodsiiin doontaa kiiskeyga hadaan ku jiro IDC-da?

- ▶ UNHCR waxay sii wadeysaa socodsiiinta kiiskaaga xittaa haddii aad ku jиро IDC. Fadlan hubi in sargaal UNHCR lala socodsiiyo inaad halkaas joogto.

## 2. Immisa waddo ayaa ii banaan si la iiga siidaayo IDC maxayna yihiin shuruuduhu?

- ▶ IDC-da waxaa maamula dowladda Thailand. UNHCR wax saameyn ah kuma laha sida loo xakameeyo IDC. Waagii hore, UNHCR waxay wada xaajood kagashay sii deynta shakhsiyadka ladaneeyo kuwaasoo si gaar ah u nugul. Tusaale ahaan. hooyooyinka heysta caruurta ama dadka qaba cuduro halis ah.
- ▶ Sharciga Socdaalka, B.E. 2522 (1979), ma meeldhigin mudada ugu badan ee uu qof kusii jiri karo xabsiga isagoo sugaya masaafuris.
- ▶ Kadib markay Dowlada Thai-ga saxeexday MoU si loo joojiyo xiritaanka caruurta bishii Janaayo 2019, hooyooyinka iyo caruurta kuwaas oo ah shaqsiyaadka ladaneeyo laakiin lagu xiray IDC waxay xaq u leeyihiiin dammaanad. Step Ahead waa qayb ka mid ah mashruuca iskaashi lala leeyahay ururada kale ee loo yaqaan Xorriyat loogu talagalay Qoysaska (Freedom for Families) kuwaas oo lacag damiin u uruuriya hooyooyinka / bixiyeyaasha daryeelka aasaasiga ah ee kujira gudaha IDC, sidoo kale iyaga umatala damaanad qaade ahaan. Lambarada lagala xiriiro: (+66) 89-106-0223 ama (+66) 96-405-4749 Email: stepaheadfostercare@gmail.com



## 3. Waa maxay nidaamka damiinashada sideena ku heli karaa?

- ▶ Kadib sixiixitaankii MoU ee joojinta xarigga caruurta, caruurta iyo hooyooyinkooda (Kuwa ladaneeyo) waxay xaq u leeyihiiin dammaanad, fadlan ka fiiri faahfaahin dheeraad ah xagga sare.



## 4. Adeegyada Caafimaad ee IDC-da

Laanta Socdaalka ayaa mas'uul ka ah daryeelka caafimaad ee gudaha IDC-da. Waxaa gudaha IDC-da kuyaalla laba rugo caafimaad. Mid waxaa maamusha Wasaaradda Caafimaadka Dadweynaha (MOPH) midda kalena waxaa maamusha Hay'adda Jesuit. Maxaabiista ayaa lagula talinayaan inay la xiriiraan rugaha caafimaad ee IDC-da si loogu helo daryeel caafimaad.

UNHCR kuma bixin kartu daryeel caafimaad IDC da gudaheeda, sikastaba ha ahaatee, UNHCR waxay awoodaa in taarikhda caafimaad ay ogolaanshahaaga kula wadaagto rugta caafimaadka ee IDC da si aad u hesho daryeel caafimaad oo dheeri ah iyo inay kula socdaan rugaha caafimaadka ee IDC da marka ay lagama maarmaanka tahay, oo ay kamid yihiin kuwa qaba xaaladaha caafimaad ee naftooda halis galinkara. Daryeel ilko lama heli karo.

## 5. La-talinta xaaladda-nafsaaniga ah ee gudaha IDC-da

- ▶ Wixii ku saabsan shakhsiyadka ey daneysyo UNHCR ee lagu hayo IDC ee u baahan taageero nafsaani / dareen, fadlan codsi ugudbiso UNHCR. Shaqaalahaa UNHCR waxay idinla soo xiriiri doonaan ka taageerida dhinaca qimaynta xaalada maskax-ahaaneed iyo talabixinta maskax-ahaan/cilmi nafsiyeed.
- ▶ BRC waxay adeeg cilmi-nafsiiga ku bixin doontaa gudaha IDC-da markii ay codsato UNHCR (labada hay'adood waxay iska kaashadaan gaarsiinta adeegga).

## 6. Sideen ula xiriiri karaa qoyskeyga ama asxaabteyda ku nool dibedda?



- ▶ Maamulka IDC-da waxay caadiyan u oggolaadaan maxaabiista inay isticmaalaan sandaqadda taleefoonka ee gudaha IDC-da hal ama laba jeer usbuucii laakiin maxaabiista ayaa mas'uul ka ah qarashka.

## 7. Ma jiraa wax iskuul ah oo loogu talagalay carruurtayda gudaha IDC-da?



- ▶ Suuragal maahan in carruurtu ay helaan waxbarasho rasmi ah inta lagu hayo gudaha IDC-da. Si kastaba ha noqotee, Thailand waxay January 2019-kii saxiixday MoU oo ah badalka xabisadda si loo joojiyo xiriitaanka carruurta (socdaalka).

## 8. Wuxaan u baahanahay qof igu soo booqda gudaha IDC-da

- ▶ Ajnabi kasta oo wata fiiso shaqeynaya ama Thai heysta dukumiinti sharci ah oo shaqeynaya waa la soo dhaweynayaa inuu soo booqdo IDC-da inta lagu jiro saacadaha booqashada laga bilaabo 8.00-11:30 am Isniinta ilaa Jimcaha (marka laga reebo ciidaha).

## 9. Sideen ku heli karaa talo sharci anigoo ah maxbuus?



- ▶ Markaad heysato waqtii aad ku isticmaasho adeegga wicitaanka laanleenka ee gudaha IDC-da, waad u madax-banaantahay inaad soo wacdo AAT. Waxaa si toos ah kuula hadli doona Mid ka mid ah qareenada. Waxaa ugu wanaagsan inaad soo wacdo Talaadada haddii aad u baahan tahay turjubaan.

## 10. Wuxaan rabaa inaan iska diiwaangaliyo UNHCR, laakiin waxaan ku jiraa IDC-da.



- ▶ Fadlan u gudbi UNHCR warqad codsi oo qoraal ah. UNHCR ayaa dib ulasoo xiriiri doonta shaqsi kasta si ay usii borosesgareeyso.

**11. Waxaan helay diidmadaydii RSD-ga ee ugu horraysay anigoo ku jiray IDC. Maxaa xiiga oo aan sameeyaa?**

- ▶ Waxaad haysataa 30 maalmood oo aad racfaan ugu gudbineyso UNHCR.
- ▶ Waxaad soo wici kartaa AAT oo aad naweydiin kartaa inaan kugu soo booqano IDC-da kadibna aan kuqimayno kiiskaaga matalaad - Qareenada AAT waxaa loo oggol yahay inay galaan IDC si ay macaamiisha ugu metelaan wareysiga ugu horeeya iyo rafcaanka. Rafcaanada, waxaa aad muhiim u ah inaan helno koobiga warqadda diidmada ee UNHCR sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah marka aad hesho kadib.



**12. UNHCR ayaa kiiskeygii xirtay anigoo kujira IDC-da.**

- ▶ Noqoshada Ikhtiyaariga ah - Fiiri qeybta ku saabsan Dib-u-celinta Ikhtiyaariga ah oo la xiriir IOM.
- ▶ Wac qareenada AAT waxayna kaala talin karaan waxyaabaha kuu banaan, oo ay kujiraan qiimeyn sharci ah ee suuragalnimada in kiiskaaga dib loo furo iyo sida loo sii guda-gali karo isku daygan hadii aad sidaas rabtid.
- ▶ Masaafurinta - kharashka masaafurinta waxaa bixinaya qofka la mastaafurinayo. In kasta oo maxaabiista ku jirta IDC ay horey u bixiyeen ganaaxa, haddana waa inay iska bixiyaan kharashka duulista iyo maamulka.

**13. UNHCR waxay ii aqoonsatay qaxooti waxaana ku jiraa IDC-da.**

- ▶ Nasiib darrose, in kasta oo aad tahay qaxooti la aqoonsan yahay, wali waxaad mudaneysaa xabsi gudaha IDC-da ah maxaa yeelay Thailand ma saxeexin Heshiiska Qaxootiga ee 1951. Marka la raaco, kaarka UNHCR kuuma ogolaanayo inaad si sharci ah udaganaato gudaha Thailand.



3

ILAALADA IYO  
BADBAADADA

## ILAALADA IYO BADBAADADA



**Maxaad sameyneysaa haddii aad wajahayso halis ama khatar waxyeelo dhismaha gurigaaga ama bulshadaada ama bulshada Thai-ga?**

1. Xaaladda degdega ah, fadlan wac UNHCR sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan hadii aad sii ogaatid halis/khatar degdeg ah.

UNHCR waxay sidoo kale talaado kasta BRC kuleedahay talabixin ilaalin laga bilaabo 09.00 - 16.30 oo ah 20 kiis maalin kasta oo ku saleysan ballan. Waxaa lagugula talinayaan inaad ballantaada kadiwaangaliso BRC shaqsi ahaan adigoo wata kaarka UNHCR oo shaqeynaya. UNHCR waxay awooddi doontaa inay qiimeyso xaaladaada una gudbiso sida loogu baahdo.

Arimo kasta oo ilaalin ah oo ey kujiraan amniga, xiritaanka / xabis, arimaha sharciga, ilaalada carruurta, galmada iyo xadgudubka ku saleysan jinsiga (SGBV) oo ay ku jiraan rabshadaha qoyska, dhaqaalaha, waxbarashada, shahaadada dhalashada/dhimashada, dhibaateyn ta bulshada (tusaale. guurka khasabka ah, dhibaateyn la xiriirta galmada. ) iyo arrimo kale oo la xiriira.

UNHCR ma bixin doonto tala bixin la xiriirta go'aaminta xaaladda qaxootinimo iyo dib-udajinta.



2. **Maxaan sameeyaa haddii mulkiilaha guriga aan daganahay uu ifaro inaan ka baxo dabaqayga ama haddii aan ubaahdo in sababo kale dartood aan u baxo oo aanan haysan meel aan aado?**

- Haddii ay jirto xaalad degdeg ah, waxaad la xiriiri kartaa UNHCR oo laga yaabo inay isku dubariddo caawimaad dheeri ah. Haddii aad tahay guri la'aan ama aad qatar ugu jirto guri la'aan xaaladaada dhaqaale awgeed, UNHCR ma awooddi inay kuugu caawiso guri ay ku dajiso. Xaaladdan oo kale waxaa lagula talinayaan inaad la xiriito qoyska / asxaabta / kaniisadda maxalliga ah, masaajid ama macbad si aad u weydiiso haddii ay ku siin karaan wax taageero ah.
- Waxaad kaloo la xiriiri kartaa JRS maalmaha shaqada: Isniinta, Talaadada iyo Khamiista laga bilaabo 9:00-15:30. JRS waxay xiriir laleedahay sadex goobood oo ah guryaha la dajiyoo xaaladaha deg-dega ah "hooy" iyadoo loo fiirinayo shuruudaha JRS iyo helitaanka hooyga. Fadlan kala xiriir emayl ahaan: [urp.caseworker@jrs.or.th](mailto:urp.caseworker@jrs.or.th) iyo cc: [urp.pd@jrs.or.th](mailto:urp.pd@jrs.or.th) ama soo wac taleefanka: (+66) 084-427-4136.
- Hoyga Xaaladda Degdega ah oo ay maamulaan Ururka kor u qaadista xaaladda Haweenka (APSW) - oo loogu talagaly haweenka iyo caruurta nugul: Waxay agagaaraha Don Muang ee Bangkok kuleey-ihiiin hooy xaaladda degdega ah. **Fadlan la xiriir 086-899-0660 ama la xiriir AAT si ay kuugu gudbiyaan maadaama ay doorbidayaan ku hadalka Thai-ga.**



**MUHIIM:** Haddii aad aragto haweeney ama cunug halis ugu jira hoy la'aan, qaar ka mid ah bixiyeyaasha adeegga maxalliga ah ayaa laga yaabaa inay caawiyaan, sidoo kale AAT iyo qaar ka mid ah NGO-yada ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan gudbinta. Fadlan nala socodsii, ama weydii cunugga / da'yarta inay laftooduba la xiriiraan AAT.

3.



### Maxaa igu dhici doona haddii laygu eeddeeyo dambi?



Dambiga gudaha Thailand waxaa loola jeedaa facil ama dhaqdhaqaaq lid ku ah sharciga dembiyada, tusaale ahaan. dil, dhac, xatooyo. Haddii lagugu soo oogo danbi aan KALIYA ku salaysnayn xaaladdaada socdaaleed magangelyo-doone ahaan/ qaxooti aan lahayn fiiso shaqeynaya (tusaale ahaan inaad haysato Baasaboor been abuur ah ama hawlo kale oo sharci-darro ah):

- Wuxuu mudan doontaa dhageysi maxkamad / baaritaanka booliska iyo nidaamka xuquuq dhowrka leh.
- Waxaa suuragal ah in lagu xiro taas awgeed. UNHCR waxay leedahay kormeer xagga xabsiga ah.

4.

### Waxaan dhibbane u ahay shaqaaqooyin laxiriira qoyskayga. Maxaa samayn karaa?



Waxaa la hadli kartaa UNHCR iyo BRC ama waxaad wargalin kartaa AAT (taasoo kaa caawin karta iney ugudbiso UNHCR). Waxaa lasameeynayaa qiimeyn loona gudbinayaa waaxyada ay khusayso QKJG (SGBV), waxyeelo jireed, doodo sharciyeed, iwm.

Waxaa jira afar habab jawaab-celin ah oo la siiyo dadka kabadbaada QKJG (SGBV)

- kaalmo caafimaad: Marka lagu daro isbitaal booliis, waxaa la xiriiri kartaa qeybta caafimaadka ee BRC si laguu gudbiyo isbitaalada kale ee dadweynaha iyadoo lagu saleynayo doorbididaada iyo sida kuugu haboon.
- Hoy degdegg ah: Codsashada kadib, waxaa lagu galin doonaa hoyga xaaladaha degdeggaa ah kaasoo noqon kara xarun gaar loo leeyahay ama mid dowladeed.
- Adeeg cilmi nafsi: Waxaa codsan kartaa talabixin xagga maskaxda ah ama daawaynta xaaladaada maskaxeed si lagaaga taageero kasoo kabashada waxyaabaha aad lasoo kulantay ee naxdinta leh. La-talinta waxaa lagu bixiyaa BRC ama JRS.
- Caawinaad xagga sharciga ah: Haddii aad rabto inaad dacwad kusoo oogto dembiile, shaqaale ilaalineed ee kasocda UNHCR ama wakiikaaga sharciga ayaa ku siin kara la-talin ku saabsan cawaaqibka togan / xun ee go'aankaaga. Haddii aad ku adkaysato inaad oogto dacwad, UNHCR waxay fududeyn doontaa iyadoo ugu baaqeysa maamulka mas'uulka ka ah inay ka tanaasulaan dacwadda socdaalka inta lagu gudajiro howlahaaga.

5.

### Waxaan ahay qof ka badbaaday tacaddi/xadgudub kusalaysan jinsi/ galmo. Xagee ayaan tan ka warbixin karaa oo aan ku heli karaa baarista cadeyn raadinta (“Qalabka PEP”)?

- Wuxuu wici kartaa UNHCR, AAT, BRC, JRS ama adeeg bixiyeyaa kale si aad udiyaariso inaad wargaliso booliska sidoo kale aad marto baaritaan caafimaad. Waa muhiim inaad tan sameyso sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan iyo ugu dambays 72 saacadood gudahood ee dhacdada QKJG (SGBV).

- Isbitalka Guud ee Boliska wuxuu siyyaa baaritaano caafimaad oo bilaash ah dadka ka badbaa-day QKJG (SGBV) hadii aad heysato ogeysiis (warbixinta booliska) oo ay boolisku soo saareen. Haddii aadan haysan ogeysiis / warbixin, qarashku waa 2,000 - 3,000 THB.
- Si kastaba ha noqotee, warbixinta boolisku qasab kuma ahan badbaadayaasha SGBV. taas badalkeed, waa xuquuq. Daryelaha badbaadaha ayaa lagala tashan doonaa Faa'iidooyinka iyo Qasaarooyinka xareynta warbixinta booliska. Markaa, badbaadaha ama daryelaha ayaa samayn kara go'aan wargelin leh.



6. **Waxaan ahay qof dumar ah xaafaddeyda ayaan cabsi ku qabaa.  
Maxaa samayn karaa?**

- La xiriir UNHCR iyo BRC.
- U tag hoggaamiyeha bulshada ama qof aad ku kalsoon tahay kuna baraaruji xaaladaada.

7. **Ma jirtaa wax gargaar ah oo loo fidiyo caruurta Thailand imaaday iyagoo kaligood ah oo uusan lasocon qof wayn?**

- UNHCR ayaa toos ugu lug leh maaraynta kiiska caruurta timid Thailand iyadoo uusan lasocon qof wayn ama dhalaanka aanan la wehelinin (UAM), Hadii aad tahay dhalaan aan la wehelinin (UAM), waxaad la socodsiin kartaa shaqaalaha diiwaan galinta ee UNHCR marka aad marayso waraysigaaga diiwaangalinta ee UNHCR si loogu gudbiyo qofka uxilsaaran ilaalada caruurta ee UNHCR kaasoo qimayn doona xaaladaada kuuna gudbin doona adeega kugu haboon.
- JRS waxay bixisaadeegyo sida latalin, cilmi nafsi, tababar xirfadeed, iwm. Loogu talagalay carruurta kaligood nool oo aan la noolayn waalidkood.
- BRC waxay siisaa carruurta aan lala soconin adeegyo la mid ah tan carruurta qaxootiga ah guud ahaan. Adeegyadan waxaa ka mid ah adeegyada waxbarashada sida fasallada luqadda Thai degdegga ah iyo fududeynta diiwaangelinta carruurta qaxootiga ah ee dhigta dugsiyada dadweynaha ee Thai-ga.



4

# QOYSKA iyo HAB-NOLOLEEDKA

## QOYSKA iyo HAB-NOLOLEEDKA

### A Guriyeyn

1

Xageen ka heli karaa guri ama dabaq raqiis ah?

Fadlan la xiriir bulshadaada, gudoomiyaha bulshadaada iyo / ama hey'adaha qaxootiga u adeega si aad uhesho gudbin iyo talo bixinno.

2

Sideen ula xajoon karaa  
Mulkiilaha gurigayga markaan  
dhib qabo?

- Fadlan la xiriir gudoomiye bulsheed ama u tag mid ka mid ah asxaabtaada ku hadasha Thai-ga ee laga yaabo inay rabaan inay caawiyaan.
- Wac hey'adaha u adeega qaxootiga oo weydii iney kula xiriiriyaan dadka ku hadla Thai-ga.

### B Taageero dhaqaale



Waxaan ubaahanahay  
Caawinaad dhaqaale.  
Yaa i caawin  
kara?



#### ► Magangalyo-doonka iyo qaxootiga:

Xarunta Qaxootiga Bangkok (BRC)

- Faragalinta lacageed ee ujeedooyinka badan (CBI) waxaa looga dan leeyahay in laga caawiyoo qoxootiga kunool magaaloo yinka sidi ay u dabooli lahaayeen baahiyahooda ugu muhiimsan iyagoo si wayn ugu madax-banaan. CBI waxay ku saleysantahay booqasho guri iyo qiimeyn tauglaanshaha. Hufnaanteeda iyo caddaaladnimadeeda waxaa damaanad ka ah shuraako badan. Guddigu waxay gaarayaan go'aanno ku saleysan kiisaska si buuxda loo diiwaangeliyay. Mudnaanta waxaa la siiyaa kuwa ugu nugul iyadoo lagu saleynayo shuruudo cad, booqasho guri, qiimayn dhamaystiran oo baahida iyo nugaylka ah oo ay sameeyaan xirfadlayaasha shaqaalaha bulshadu.
- 167/1 Soi Ratchadaphisek 36 Yaek 19-9, Chan Kasem, Chatuchak, Bangkok 10900
- Tel: (+66) 2-512-5632-4 EXT 101 (Isniinta - Jimcaha)

## UNHCR

- UNHCR iyo COEER-BRC waa shuraako fuliya howlaha adeega bulshada.
- UNHCR iyo COEER-BRC waxay bixiyaan taageero dhaqaale oo loogu talagalay qaxootiga ku jira IDC-da iyo dibedda IDC-da iyadoo loo sii marayo qaab-dhismeedka CBI (Faragalin kusaleysan lacag cadaan ah). Taageeradu ma ahan mid toos ah oo waxaa loo tixgalin doonaa si ku saleysan kiisba xaaladdiisa.
- Fadlan ka raadso talo dheeri ah oo kusaabsan hannaanka CBI meesha maclummaadka CBI-da.


► DADKA MAGANGALYO DOONKA AH:

Adeegga Qaxootiga ee Jesuit (JRS) Barnaamijka Qaxootiga Magaalooinka (JRS-URP)

- Kuwa u baahan caawimaad waxay iman karaan maalmaha la qaabilo dadka aan balanta haysanin: Isninta, Talaadada, iyo Khamiista laga bilaabo 9:00 - 15:30. Taageero maaliyadeed ayaa la siin doonaa kuwa buuxiya shuruudaha URP.  
Lambarka lagala xiriirayo: (+66) 084-427-4136 limayl:  
urp.caseworker@jrs.or.th iyo cc: urp.pd@jrs.or.th  
43 Wadada Phahonyothin, Soi Rachawithi 12, Victory Monument, Phayathai.

# C Hab-nololeedka

1

Ma jiraan ururo kordhinaya / kor u qaadaya fursadaha nololeed ee magangalyo-doonka iyo qaxootiga?

HOST International iyo AAT waxay wadaan mashruucyo ay kamid yihiin CHAMALiiN si kor loogu qaado nolosha dumarka qaxootiga. Wixii maclummaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir AAT iyo HOST International.

2

Waa maxay khataraha shaqeynta ogolaansho shaqo la'aanteed?

Dhamaan ajaaniibta (muwaadiniinta aan Thai-ga ahayn) waa inay helaan fiiso shaqaynaysa iyo ogolaansho shaqo si loo shaqaaleysiisto rasmi ahaan.

Haddii aad shaqeyso ogolaansho la'aan, markaa waxaa jirta halis ah in lagu qabto, laguugu hayo IDC, lagu weydiyo inaad bixiso ganaax oo lagu masaafuliyo. Waxa kale oo jirta khatarta ah in lagu qaado dacwad dambi.

3

Is there any assistance if I am disabled and cannot work?

Xarunta Qaxootiga Bangkok (BRC) waxay wadaa mashruuca faragalinta lacageed ee ujeedooyinka badan (CBI) si loogu caawiyo qaxootiga. CBI waxay ku saleysan tahay booqashada guriga iyo qiimeyeenta nuglaanta. Fadlan kala xiriir BRC wixii maclummaad dheeri ah.

Haddii aad tiihin magangalyo-doон, fadlan faahfaahin dheeri ah kala xiriira JRS.



## D Caafimaadka iyo Fayo-qabka

1

Maxaan sameeyaa hadii aan xanuunsado?



Waxaad la xiriiri kartaa UNHCR adiga oo caawimaad ka helaya Xarunta Qaxootiga Bangkok ee ku saleysan hadba xaaladda kiiska. Xarunta qaxootiga Bangkok (BRC) waxay kuu diyaarin kartaa:

- Liisaska isbitaalada dowladda iyo xarumaha caafimaadka dadweynaha ee agtaada ah iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan kaalmada dhaqaale ee loogu talagalay kiisaska keeni kara halis dhimasho.
- Macluumaadka talaalka
- Talo ku saabsan qorshaynta qoyska iyo xakamaynta dhalmada
- Inay turjubaan kuugu diyaarisoo isbitaalaka Rajavithi laakiin hal maalin ama ka badan ogeysiis hore ayaa loo baahan yahay
- Macluumaadka iyo la-talin ku saabsan kaalmada daawo qorista
- Qiimeyn maskax ahaaneed
- Dhiirrigelinta nadaafadda
- Helitaanka adeegyo dowlaadeed iyo adeegyo kale oo la heli karo.

**Daryeelka guud ee lacag-celinta waxaa ka mid ah:**

- Daweyn waxa nolosha khatar ku ah.
- Daryeel xaaladda deg-degga ah / shil (keliya xaalad khatar ku ah nolosha)
- Daryeelka caafimaad ee uurka iyo dhallaanka ( kaliya uurka ugu horeeya ee gudaha Thailand)
- Talaal sida uu dhigayo tilmaamaha qaran ee xarunta caafimaadka dadweynaha
- Helitaanka ka-hortagga, tijaabinta iyo daryeelka HIV / AIDS, SGBV, TB iyo kiisaska STI iyo qaar ka mid xaaladaha dabadheeraada.

Fadlan la xiriir BRC si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Lacalla haddi ey noqoto lacag celin caafimaad, waxaa loo baahanyahay warbixin caafimaad.

### MACLUUMAAD MUHIIM AH OO KU SAABSAN TAAGEERADA CAAFIMAADKA EE BRC

- BRC waxay marka hore kaa rabtaa inaad ogeysiiso KAHOR booqashada isbitaalka.
- Fadlan kawac BRC 02 512-5632-4 sii riix 108 inta lagu jiro saacadaha xafiiska.
- Xaaladaha degdega ah saacadaha shaqada ka dib, kala xiriir lambarkooda xaaladaha degdega ah ee 08 6010 4117 kaasoo shaqeeya maalin kasta laga bilaabo 07: 00–23: 00 silaguu siiyo hagitaan ku saabsan xaaladaha degdega ah (adeegga turjumaanka waxaa la heli karaa oo keliya lagabilaabo 09:00-16:00 maalmaha shaqada ee todobaadka).

Haddii kale, waxaad booqan kartaa ururka Tzu Chi iyo kiliniiga Suksala Nanak.

Ururka Tzu Chi wuxuu leeyahay xarun caafimaad oo BILAASH ah oo si joogto ah ah ushaqeysa bil kasta axadda ugu dambeeysa laga bilaabo saacadaha 09.00-15.00 kasoo horjeedka Suan Luang Ror Kao (Suan Luang Rama IX). Si aad uhesho akhbaar dheeri ah, fadlan booqo websaydka Tzu Chi <<https://tzuchithailand.org/th>> wac (+66) 2-328-1161>. Daawooyinka la bixiyo waxaa kamid ah:

- Daawooyinka guud, tallaalka carruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano
- Daaweynta ilkaha oo loogu talagalay dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano (ilaa 2-3 jeer sanadkii)
- Bas bilaash ah oo kasoo baxa UdomSuk BTS (xarunta tareenka Sky) balse ku xiran helitaanka
- Daawayn bilaash ah oo bishiiba hal mar loo sameeyo qaxootiga kiiskoodu shaqaynayo
- Baarista dhiigga iyo shayaarka aasaasiga ah
- Rugta xaaladda nafsaaniga ah
- Daryeelka cirbadaha lagu mudo maqaarka

- Waxay leedahay dhakhtar dumar ah oo ku hadasha Ingiriis, Thai iyo Hindi
- Waxaa kashaqeeya bulshada Sikh.
- Majirto lacag dhakhtar laakiin waxaad bixineysaa (ugu badnaan 200 oo baad) oo ah dawada

#### Naftaada ahaan

- Farmashiyaal badan ayaa leh farmashiste ku hadla Ingiriisiga oo kaa caawin kara daawooyinka aad dukaanka uga soo iibsan karto, xitaa haddii ay tahay antibiyyotig.
- La soco in magacyada astaanta Thai-ga ay ka raqiisanyihiin kuwa shisheeye
- Isbitaalada dowladda iyo xarumaha caafimaadka dadweynaha aad ayey uga jabanyihiin kuwa gaarka loo leeyahay

**Kawaran haddii aan shil galo?**



- Fadlan la xiriir BRC sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan. Daaweynta la magdhabti karo ee loogu talagalay daryeelka degdeggaa ah / shilka waa marka ay jirto xaalad nolosha halis ku ah. Warbixin caafimaad ayaa loo baahanyahay

**Xageen ka heli karaa adeegyada caafimaadka dhimirka?**



- Waxaad la xiriir kartaa qaybta Caafimaadka ee BRC si tixraac dheeri ah laguu siyo.
- Haddii adiga ama cid kale aad ubaahantiihiin taageero maskax ahaaneed / xaalad nafsaani bulsho iyo la tacaalidda walaaca, fadlan tag JRS-URP Isniinta ama Talaadada ama Khamiista.

**Yaa i caawin kara haddii aan uur leeyahay?**



- Fadlan la xiriir BRC haddii aad uur leedahay oo aad u baahan tahay caawinaad. Fadlan la soco in BRC-du ay dabooli doonto qarashka daryeelka heerka-bilowga-uurka (oo ku xaddidan 5 jeer) iyo umulinta ilmaha oo loogu talagalay hooyoooyinka markii ugu horeysay uurka kuqaada gudaha Thailand.
- BRC waxay bixisaa la talin, macluumaad iyo caawimaad kusaabsan arrimaha qorshaynta qoyska

**Anigu wali kama diiwaangashani UNHCR ama kiiskeyga UNHCR waa la xiray mana awoodi doono inaan mar dambe helo adeegyada caafimaadka iyo maaliyadda ee BRC.**

5

- Isku day inaad hesho xarunta caafimaadka dadweynaha ee kuugu dhow oo xusuusnow in Thailand, daawooyinkan badan laga heli karo farmashiyada. Dwoooyinka ey sameeyaan Thai-ga ayaa inbadan ka raqiisan dwoooyinka la soo dhoofyo.
- Haddii aad wali go'aan kasugeyso diiwaangelinta UNHCR ama kiiskaagu xiranyahay, fadlan la xiriir BRC adoo adeegsanaya lambarka tooska ah ee caafimaadka si aad wax uga weydiiso xarumaha caafimaadka dadweynaha iyo / ama isbitaallada agagaarahaaga sida kor lagu soo xusay. Qaarkood waxay daryeel caafimaad kubixiyaan 50 baad. Sidoo kale waa inaad iska bixisaa lacagta daawooyinka. Kiliiniga Tzu Chi waa fursad kale oo loogu talagalay xanuunada aan degdeggaa ahayn.



**Halkeen ka heli karaa baaritaanka qaaxada (TB-da) oo bilaash ah?**



- Qaaxada iyo HIV / AIDS, BRC waxay dabooli doontaa baaritaanka iyo daaweynta sida ay ku taliyaan dhakhaatiirta, fadlan la xiriir qeybta Adeegyada Caafimaadka iyo Gudbinta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah maalin kasta inta lagu jiro saacadaha shaqada.

# E QOYSKA



## 1. Yaa iga caawin kara hadaan rabo inaan raadiyo qof qoyska ka mid ah oo maqan?

ICRC, Laanqeyrta Cas ee waddankan, iyo Ururka Bisha Cas, waxay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan adduunka si ay uhelaan meesha ay dadku ku suganyihiin dibna ula xiriirsiiyaan qoysaskoodii. Wuxaad la xiriiri kartaa AAT si ey kuula xiriiriyaan iyaga.



Wuxaad sidoo kale toos ula xiriiri kartaa hey'adaha:

### Ururka Laanqayrta Cas ee Thai-ga

- (+66) 2-256-4032-6 ama 1644, iimayl: webmaster@redcross.or.th
- Ururka Laanqayrta Cas ee Thai-ga, Waaxda Xiriirka Caalamiga, Xafiiska Maamulka, Dhismaha Terd Prakiat 1871, Henry Dunant Road, Bangkok 10330

### Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC)

- Telefoon: (+66) 2-262-1680, iimayl: ban\_prot@icrc.org
- Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas, Ergada Gobolka, 191 / 6-8 CTI Tower, Dabaqa 30-aad, Wadada Ratchadapisek, Klongtoey, Bangkok 10110, THAILAND

## 2. Sideen ula tacaalaa geerida xubin qoys ka mid ah ee Thailand?

Kuwa leh kiis shaqeynaya, waxaad la xiriiri kartaan UNHCR ama AAT si aad u hesho caawimaad dheeraad ah iyo talo ku saabsan sida loo helo shahaadada dhimashada. BRC waxay qaxootiga kiiskoodu shaqeynayo siisa taageero aaska marka loo eego qaab dhismeedka CBI. Fadlan la xiriir: (+66) 2-512-5632-4 sii riix 101.

S

# WAXBARASHADA

# A Waxbarashada Caruurta

Waxaan rabaa in aan caruurtayda ka qoro iskuulka dadweynaha ee Thai-ga.

1

Thailand waxay leedahay nidaam waxbarasho, oo loo yaqaan "Waxbarsho loogu talagalay dhammaan", taas oo kor u qaadeysa helista waxbarasho ee dhammaan carruurta ku nool Thailand. UNHCR (iyada oo loo sii marayo iskaashatada COERR) waxay bixisa casharo deg deg ah oo Thai ah oo lagu dhigo iskoolka Good Shephard Sisters (GSS) - oo loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 6-17. Fasalada waxaa la qabtaa Isniinta ilaa Jimcaha (marka laga reebo Arbacada) inta u dhaxaysa 10:00 - 15:00 iyada oo ay weheliso hal saac oo nasasho ah xiliga qadada.

Caruurtaydu ma heli doonaan shahaado qalinjabinta kadib?



Maya, waqtii xaadirkan majiro dukumiinti rasmi ah qalinjabinta kadib oo loogu talagalay barnaamijka barashada Thai-ga ee degdega ah. Si kastaba ha noqotee, kuwa wax ka barta dugsiyada dadweynaha ee Thai-ga (oo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada) waxay heli doonaan shahaadada rasmiga ah markay qalin jabiyaan.



BRC waxay sidookale fududaysaa gelitaanka carruurta ee iskuulada dadweynaha Thai iyo kuwa gaarka loo leeyahay iyo sidoo kale iskuulada caalamiga ee sida rasmiga loo aqoonsan yahay ee heerarka dugsiga hoose iyo kan sare labadaba. Caawinta waxaa la waafajin doonaa u qalmitaanka iyo Heerka Caawinta Qaxootiga iyo Magangalyo-doonda. Ka sokow taasi BRC waxay kaloo bixisa la-talin iyo wax kala fahansii ay usamayso waalidiinta iyo ardayda.

Diiwaangelinta iyo macluumaad dheeri ah, fadlan kala xiriir waaxda waxbarashada ee BRC (+66) 2-512-5632-4 EXT 308 ama 309.

2



Maxaan sameeyaa haddii aan rabo in caruurtaydu horumariyaan xirfadahooda Ingiriisiga?

Waxa jira ururo aan dawli ahayn ama ururo kale oo bixiya koorsoojin Ingiriis ah.

3

# B Waxbarasho aan rasmi ahayn



Ma jiraan qaabab kale oo wax lagu baro carruurtayda?

Waxaa jira tiro ururo ah oo ujeedadoodu tahay inay taageeraan waxbarashada iyo waxbarashada xirfadda ee magangalyo-doona iyo qaxootiga. Wuxaad liiska ka heli kartaa hoos:



## Courageous Kitchen

- Fadlan horaan ula xiriir ururkan si aad u ogaato in lahel karo iyo inkale.
- Kooxaha bartilmaameedka: Fasalada carruurta (da'dooda 3 ilaa 6) 10:00 - 12:00 Isniinta, Arbacada iyo Jimcaha
- Fasallo loogu talagalay da'yarta (da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 17) Sabti walba 10:00 - 15:00
- Qoys kasta oo qaxooti ah oo ku nool Safan Mai waxay xor uyihii inay ku biiraan.
- Faahfaahinta xiriirka: agagaaraha Saphan Mai, <http://courageouskitchen.org> Walaalaha

## Iskuulka Luqadaha ee Good Shepherd Sisters

- Kooxaha bartilmaameedka: Carruurta laga bilaabo xanaanada - 17 jirka iyo dadka waaweyn.
- Caruurtu waxay baran karaan luuqada Thai-ga, ingiriisiga, cilmiga bulshada iyo xisaabta.
- Faahfaahinta xiriirka: (+66) 2-245-0457, limayl: [info@goodshepherdbangkok.com](mailto:info@goodshepherdbangkok.com), 4128/1
- [www.goodshepherdbangkok.com](http://www.goodshepherdbangkok.com)
- Saacadaha Xafiska: Isniinta ilaa Jimcaha, 09:00-16:00


## Friendship bridge

(Kaniisadda Bangjak Baptist)

- Xarunta Ingiriisiga ee Friendship Bridge waa meel wanaagsan oo si bilaash ah loogu barto Ingiriisiga.
- Fasalada waxaa la qabtaa usbuuc walba maalmaha Jimcaha iyo Sabtida laga bilaabo 18:00-19:30, iyo Axadaha laga bilaabo 10:00-11:00.
- Casharada waxaa ka mid ah sidoo kale barashada Baybalka.
- Faahfaahinta xiriirka: (+66) 2-746-1502, Email [bjbangkok@gmail.com](mailto:bjbangkok@gmail.com), Sukhumvit 101/1 Rd, Khwaeng Bang Chak, Khet Phra Khanong, Krung Thep Maha Nakhon 10260
- [www.facebook.com/pages/Bangjak-Batist-Church/380957921958712](https://www.facebook.com/pages/Bangjak-Batist-Church/380957921958712)

# C Waxbarashada dadka waaweyn

Waa maxay wadooyihin iifuran ee aan si onlayn ah intarneetka uga barankaro waxbarashooyinka sare/jaamacadaha ama kuwo kale?



## Xarunta Qaxootiga Bangkok

- Faahfaahinta xiriirka: 167/1 Soi Ratchadaphisek 36 Yaek 19-9, Chan Kasem, Chatuchak, Bangkok 10900
- Telefoon (+66) 2-512-5632-4 sii riix 10

## Ururka Hal-abuurka Nolosha ee Kaniisadda Masiixiga

- Faahfaahinta xiriirka: 170/23 Soi Phra Phinit, Suan Phlu, Thung Maha Mek, Sathon Bangkok Thailand 10120
- Telefoon (+66) 2-679-3180
- [www.creativelifefoundation.com](http://www.creativelifefoundation.com)
- [www.facebook.com/creativelifefoundation/](https://www.facebook.com/creativelifefoundation/)

Waa maxay wadooyinka iifuran ee aan si onlayn ah intarneetka uga barankaro waxbarashooyinka sare/jaamacadaha ama kuwo kale?



### Future Learn ([www.futurelearn.com](http://www.futurelearn.com))

- Boqolaal koorso oo online ah oo BILAASH ah oo laga helo jaamacadaha ugu sarreeya iyo urur takhasus leh.



### open2study ([www.open2study.com](http://www.open2study.com))

- [www.open2study.com](http://www.open2study.com) - waa madal internetka laga helo oo bixiya koorsooyin kaladuwani.
- Koorsooyinku dhammaantood maahan lacag la'aan, fadlan hubi marka aad is qoreyso.
- Waxaad heli doontaa shahaadada dhameynta oo bilaash ah oo lagu dari karo taariikhda shaqadaada.
- Koorsooyinkaan looma xisaabsan karo heer jaamacadeed ahaan



### University of the People (UoPeople) ([www.uopeople.edu](http://www.uopeople.edu))

- University of the people waa jaamacaddii ugu horreysay oo la aqoonsanyahay oo waxbarasho bilaash ah kubixisa qaab online ah. UePeople waxaa loogu talagalay inay caawiso kuwa kasoo qalin jabiyyat dugsiga sare ee uqalma in ay ka gudbaan caqabada-ha shakhsiyeed, siyaasadeed, juqraafi ahaaneed, iyo dhaqaale ahaaned ee kahorjoogsanaya in ay sii wataan waxbarashada kuliyadaha.
- Si aad ugu qalanto gelitaanka waxbarashada heerka koobaad barkeed ama shahaadada heerka koobad ee UoPeople, codsadaayaashu waa inay ugu yaraan yihiin 18 jir, waa inay haystaan dibloomaa dugsiga sare waana inay caddeeyaa heerka aqonta Ingiriisiga ee TOEFL / IELTS iwm.
- Si laguugu oggolaado barnaamijka MBA ee 'UoPeople', codsadaayaashu waa inay ahaadaan kuwa aqontooda ingiriisiga dhameystirantahay, ka qaatay shahaadada koowaad ee kulliyadda ama jaamacadda, waa inay ugu yaraan lahaadaan labo sano oo waayo-aragnimo shaqo oo waqtibuu ah, waana inay keenaan warqad talobixin ah.



### edX ([www.edx.org](http://www.edx.org))

- Tani waa meesha khadka tooska ah ee kubaxa Ingiriisiga taasoo bixisa tiro koorsooyin ah oo bilaash ah.
- Si kastaba ha noqotee, waxaad u baahan tahay acoon bangi ama kaarka deynta si aad isaga qorto koorsada lacagta lagu bixiyo ama aad uhesho shahaado.



### Kiron Online (<https://kiron.ngo>)

- Kiron waa hay'ad aan faaido doon ahayn oo doonaysa iney caawiso qaxootiga, Barakacayaasha iyo magangalyo-doona sidii ay ku heli lahaayeen waxbarasho sare si lacag la'aan ah (Koorsooyinku badanaa waxay qaataan 3 sano).
- Kiron waa bilaash, laakiin waxaa loogu talagalay oo keliya qaxootiga, Barakacayaasha iyo magangalyo-doona.
- Kiron ujeedadeedu waa iney ardaydeeda unawareejiso jaamacadaha ay wada shaqeeyaa ee kuyaalla waddanka ardaygu deggan yahay. Haddii aad ku sugar tahay waddan eysan Kiron wali kuyeelan shurako, wali waad codsan kartaa mid ka mid ah jaamacadaha shuraakada si aad u dhammaysato shahaadadaada




### MACLUUMAAD MUHIIM AH OO KUSAABSAN

- Kiron waa fursad waxbarasho, laakiin ma aha jaamacad - Kiron ma bixiso marin toos ah oo jaamacadeed ama shahaadooyin.
- Kiron ma ahan jaamacad rasmi ah, laakiin waa adeeg bixiyayaal kaa caawinaya bilowga waxbarashadaa koorsooyinka khadka tooska ah.
- Kiron ma bixiso koorsooyinka jaamacadda heerka labaad ah.
- Iska qoridda Kiron arday ahaan kuma siineyso wax sharci ah oo arday ahaan ah wadankasta.

### Coursera (<https://refugees.coursera.org/>)

- Coursera waxay bixisa fursad guud oo laga helayo jaamacadaha heerarka sare ah oo ay iskaasha-daan iyo ururada bixiya koorsooyinka khadka tooska ah.
- Barnaamij cusub oo ay wakiil katahay dowladda Mareykanka ayaa ka dhaafi doona qaxootiga lacagta koorsada.
- Haddii aad hesho Kaalmada dhaqaale ee kooras khaas ah, waxay quseysaa koorsadaas oo keliya. Waaad awoodi doontaa inaad gasho dhammaan waxyabaha ey koorsada kakoobantahay oo aad dhammaystirto dhammaan shaqooyinka loo baahan yahay si aad uhesho shahaadada koorsada.
- Waaad xirfadaada kuhadalka ingiriisiga ku horumarin kartaa Coursera ka hor intaadan dalban mid ka mid ah barnaamijyada jaamacadha heerka koobaad ee qadka bilaashka ah ee la heli karo!
- Qaxootiga iyo magangalyo-doonka ka diiwaangashan UNHCR waxay la xiriiri karaan BRC haddii ay rabaan inay is diiwaangeliyan. Waxaa jira Koorasyo badan oo lagu heli karo luqado badan.



## D Tababarka Xirfadaha/Mihndadda

Ma jiraa urur kashaqeeyaa barnaamij tababaro xirfadeed oo loogu talagalay magangalyo-doonka iyo qaxootiga sidoo kale tababar nooceee ah ayay qabtaan?



### Deeqda-waxbarasho ee hawla xirfad-dhisidda (SAS) ee ay bixiyaan Good Shepherd Sisters

- Waxay iskuulka Good shepherd kubixiyaan Ingiriisiga, Thai-ga iyo xirfadaha mihnadeed (Shan maalmood/ usbuucii).
- Kaqeybgalayaasha waxaa looga baahan yahay inay sheegaan dhiirgelintooda sababta ay ujecelyihiin iney ka qeybqataan barnaamijka.
- Ka qaybgalayaasha waxaa lasiin doonaa kaalmo loogu talagalay baahida aasaasiga ee guryaha iyo cunnada bilwalba, taasoo ay shuruud utahay kolba sida ay iskoolka uyimaadaan.

### Good Shepherd Sisters

- Koorsooyinka xirfadaha la suuq-geyn karo, luqadda Thai-ga, timo qurxinta, dhar-usameynta dadka waaweyn
- Faahfaahinta xiriirkha: (+66) 2-245-0457, imayl: [shepherd@cscoms.com](mailto:shepherd@cscoms.com), 4128/1 Din Daeng Road

### Courageous Kitchen

- Waxey bixiyaan casharrada karinta, cunto qaybinta, iyo kaalmo dhaqaale oo yar.
- Faahfaahinta xiriirkha: Saphan Mai area, Sukhumvit 101/1 <http://courageouskitchen.org>

### HOST iyo AAT – Mashruuca Chamaliin

- CHAMALIIN boos ayay u samaysaa sidookalena dumarka waxay siisaa qalabkii ay kusoo saari lahaayeen farsamooyinka gacanta ee muujinaya astaamahooda dhaqan-ahaaneed. Mashruucan wuxuu isku dayaya inuu dhaqaale ahaan iyo bulsho ahaanba ku xoojiyo haweenka iyadoo la horuminaayo xirfadahooda, kor loo qaadayo udiyaargarowga hab-nololeedka iyo helitaanka fursadaha dakhli abuurista si ay iyagu u noqdaan kuwa naftooda ku tiirsan. Wixii macluumaad dheeri ah fadlan kala xiriir HOST International iyo AAT.



6

WAXYAABAHA LASAMEEYO

iyo WAXYAABAHA aan LAGU

SAMEYN gudaha Thailand

## WAXYAABAHA LASAMEEYO iyo WAXYAABAHA aan LAGU SAMEYN gudaha Thailand

### SAMEE

Si haboon ugu labbisoo goobaha macbadyada ama taallooyinka

Raac sharuucda Thai-ga ee anshaxa bulshada dhexdeeda, si aad oga fogatoo cudurdaa kasta oo uu booliisku kugu joojinayo. Thailand gudeheeda waxaa laguu joojin karaa oo sidookale lagugu ganaaxi karaa:

- Wadada oo aad si sharci darro ah ugooyo
- Qashin daadinta
- Sigaar ku cabista aagagga dadweynaha oo ay ku jiraan xarumaha dawladda, macbadka, boosteejada, maqaayadaha, jardiinooyinka, ivm.

Sida ugu fican ugu dadaal inaad daryeeshid caafimaadkaaga iyo nadaafadaada. Ulabiso una noolow si nadiif ah oo hagaagsan

Xiriir wanaagsan la yeelo deriska Thai-ga iyo bulshada. (tusaale ahaan adoo noqonaya qof caawinaad badan oo deeqli ah) Xushmee dhaqankooda iyo caadadooda. Inaad yeelato deris wanaagsan waxay ku siin kartaa macluumaad waxtar leh.

Hoos udhig lugaha / Madaxa kor - Thailand gudaheeda madaxaaga waxaa loo arkaa mid sarreya oo barakeysan cagahaaguna waxaa loo tixgelinaya inay hooseeyaan oo ey wasakh yihiin. Waxaa loo arkaa inay edeb-darro tahay inaad cagahaaga kasara mariso qof kale madaxiisa (gaar ahaan haddii ay kaa weynyihii). Tilmaamida ama kutaabashada shay cagaha waxaa sidoo kale loo arkaa inay edeb-darro tahay. Xusuusnow inaad saarto kabahaaga markaad galayso guriga Thai-ga ama goob muqadas ah.

Ixtiraam Boqorka iyo qoyska boqortooyada - Dadka Thai-ga waxay ixtiraam weyn umuujyaan Boqorka iyo qoyska boqortooyada waana inaad markasta ixtiraam ugu muujisaa iyaga sida soo boqde Thailand oo kale. Sharciga Lese Majeste - Xeerka dambiga Thai-ga wuxuu sharraxayaa qodobka 112aad: "Ku alla kii kuxadgudba, caaya ama u hanjaba Boqorka, Boqoradda, dhaxal sugaha ama sii hayaha boqortooyada, waxaa lagu ciqaabi doonaa min saddex ilaa shan iyo tobant sano oo xarig ah."

Qorshe usamayso xaaladaha oo dhan, oo uu weheliyo qorshe 2aad oo aad kubadalan karto, iyo qorshe kale oo isna kuusii badala qorshahaas

### HA SAMEYN

Ha xanaaqin oo meel fagaaro ah ha ka qaylin ama habilaabin iska hor imaad - dadka Thai-ga ah guud ahaan waxay u hadlaan si dabacsan waxayna iska ilaaliyaan isku dhaca si kasta oo ay awoodaan. Fadlan ha qaylin ama codkaaga kor ha u qaadin.

Ha cabbin khamri. Tani waa arinta ugu muhiimsan ee kuu horseedaysa buuq.

Haka talaabsanin qof kale lugihisa ama cagahiisa - Thailand gudaheeda waxaa loo arkaa inay tahay wax aad edeb-darro ama akhlaaq xumo u ah inaad ka talaabsato lugaha ama cagaha qofkale oo fidsan. Waa inaad kasoo wareegtaa meesha ay cagahoodu ku dhamaadaan

Ha far-fiqin: inaad farta ku fiiqdid qof waxaa loo arkaa inay edeb-darro kutahay dhaqammo badan laakiin gaar ahaan gudaha Thailand. Haddii ay tahay inaad qof tilmaanto, kor uqaad garkaaga adigoo uleexinaya xaga jihada qofka. Markaad u ugu gacan-haatineyo qof inuu kuu yimaado, ha u isticmaalin faro kor loofiqiy; ku aaddi calaacashaada iyo farahaaga oo toosan xaga dhulka. Marka aad far-fiqeyso walxa aan nooleyn iyo xayaanka, waxaa aad u ixtiraam badan in gacantaada oo dhan ku tilmaanto halkii aad ka isticmaali lahayd hal far.

Ha isku dayin inaad kusafartaan kooxo badan hana isugu imaanina kooxo buuq badan banaanka dhismahaaga.

Cidna hala wadaagin xaaladdaada RSD-ga. Si adag sir hakuugu ahaato adiga .

HA dhunkan ama haku muujin jacayl badan dadweynaha dhexdooda.

## WAXYAABAHA LASAMEEYO iyo WAXYAABAHA aan LAGU SAMEYN gudaha Thailand





Waxaa maalgalisay dawladda Maraykanka